

## Waalid ahaan waxaad xaq u leedahay...

- Inaad ogsoon tahay aqoonta macallimiinta ilmahaaga wax baraysa.
- Marka uu cunugaaga la shaqaynayo macallin ku meel gaar ah muddo ka badan afar asbuuc & aqoonta macallinka.
- Inaad ogaato heerka imitxaanka gobolka uu kaga jiro cunugaaga dugsiigiisu.
- In dugsiiga cunugaagu si joogto ah kuugula xiriiro luqad aad garanayso/fahmayso.
- Inaad la shaqayso waalidka kale iyo shaqaalaha, si aad u wada samaysaan xiriir shaqo isku xiran ee dugsiiga iyo waalidka ka dhexeeya.
- Inaad ka qayb qaadato sida loo kharaj garaynayo lacagta loogu talagalay ka qayb qaadashada waalidka.
- Inaad kala shaqayso macallimiinta, waalidka iyo maamulaha dugsiiga qorsaha ka qayb qaadashada qoyska.
- In aad codsan karto la kulan macallinka ama maamulaha cunugaaga dugsiigiisa.

### Barnaamijyada Maal-gashan & Dib-u-hagaajinta Dugsiiga

1250 West Broadway Avenue  
Minneapolis, MN 55411

Phone: 612.668.0690

Fax: 612.668.0865

Email:

[Funded.Programs@mpls.k12.mn.us](mailto:Funded.Programs@mpls.k12.mn.us)



Muxuu  
Yahay  
Title I?



MINNEAPOLIS  
PUBLIC SCHOOLS  
Urban Education. Global Citizens.

Barnaamijyada Maal-gashan & Dib-u-hagaajinta Dugsiiga

Phone: 612.668.0690



## Qorshaha Waxqabadka Waalidka

Qorshaha Waxqabadka Waalidka  
Cunugaaga ku caawi siduu u  
kororsan lahaa fursadaha ku  
guulaysiga tacliimeed:

### Muxuu yahay Title I?

Title I waa barnaamij Dawladda dhexe maalgaliso ee Xeerka Dugsiyada Hoose & Sare [Elementary & Secondary Act (ESEA)] looguna talagalay inuu taageero ka siiyo ardayda ka hooseeya heer fasalkooda dhinacyada akhriska/xisaabta. Himiladu waa in la xoojiyo heer naqdi tacliin sare si loogu caawiyo ardaydu inay ku guulaystaan fasalada tacliinta dhexe una gaaraan heerka tacliimeed ee fasalkooda.

### Maxay yihiin Qaar ka mid ah adeegyada Title I?

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ayaa siisa adeegyo barnaamijka Title I ardayda u qalanta baahidaasi ee dugsiyo gaar ah. Dhismayaasha qaarkood, tan ayaa macnaheedu noqon karaa barnaamijxo la xushay ayaa ku heli kara taageeradaasi fasalkooda dhexdiisa ama goob kale ee ka tirsan isla dugsigooda. Badida Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis ayaa leh Title I dugsiya oo idila taasoo macnaheedu yahay in adeegyo dheeraad ah oo u diyaar ah si loo taamo baahida dhammaan ardayda dugsiya. Sida badan, adeegyada ayaa xoog saara siin kaalmo dheeraad ah ee dhinacyada akhriska iyo/ama xisaabta, balse adeegyada waxaa ka mid noqon kara xirfadaha bulshada, taageero soo xaadiridda, adeegyada caafimaadka, iwm.

### Dugsiyada oo idil miyey leeyihiin barnaamijka Title I?

Maya. Habraac dawladda dhexe ayaa u baahan in barnaamijyada Title I laga heli karo dugsiyada ay ku badan yihiin ardayda saboolka ah/dakhligoodu hooseeyo. Markii uu dugsiyo ugu qalmo baahi tacliimeed - aanse xaalad dhaqaale ahayn - ayaa lagu gartaa haddii ay ardaydu u qalmaan inay helaan waxbarasho dheeraad ah. Goob kasta ee waxbarasho ayaa ka fekerta fasallada loo adeegayo. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraada ee la xiriira barnaamijka Title I, weydii marka la qabanayo shirka sannadlaha ee qoysaska Title I.

### Yey Yihiin Ardayda Title I?

Waa ardayda la caddeeyey inay u baahan yihiin in la siiyo adeegyada Title I kuwaasi oo ku dhib qaba dhinaca waxbarashada iyo walaacyada kale ee saamaynta ku yeelanaya guul gaadhkooda tacliimeed. In ta badan ardayda waxaa tilmaama macallinka fasalka kuna saleeya dhibcahooda imtixaanka iyo cabbirrada kale tacliimeed. Kuwa qaba baahida ugu weyn isla markaasna aan helin adeegyada waxbarashada dheeraadka ah ayaa marka hore loo adeegaa.

- Hubi in cunugaagu dugsiya maalin kasta ku yimaado waqtiga loogu talagalay diyaarna u yahay maalin kasta inuu waxbarto.
- Maalin kastaba weydii waxa cunugaagu ka soo bartay dugsiya.
- Si joogto ah ula xiriir-wadaag.
- Cunugaaga macallinkiisa (fariimaha, e-mail, fariimo, shirarka).
- Ka soo qayb gal shirarka dugsiya.
- Booqo cunugaaga fasalkiisa ama mutadawac u noqo cunugaaga dugsiyiisa.
- Kala hadal cunugaaga macallinkiisa shirarka iyo mawduucyada saamayn kara cunugaaga shaqadiisa iyo dhaqankiisa/dabeecadiisa.

### Sidee Waalidku uga qayb qaadan karaan?

- Baranaamijyada dugsiya oo idila (school-wide) iyo kuwa himilada leh (targeted), waalidka ayaa lagu martigalinayaa inay ka qayb qaataan shirka sannadlaha Title I.
- Waalidka ayaa lagu wargalinayaa haddii uu cunugoodu u qalmo ka qayb qaadashada Title I.
- Waalidka, macallimiinta iyo ardayda ayaa ka qayb qaata fulinta heshiis qeexaya himilada iyo mas'uuliyad la wadaago ee cunugga, dugsiya iyo waalidku inay ka wadada shaqeeyaan guulaysiga ardayga.
- Waalidka ayaa lagu dhiirrigalinaya inay ka qayb qaataan shirkarka iyo fursadaha meelaha bamaan waxbarashada Title I.
- Waalidka ayey shaqaalaha Title I macluumaad ku siiyan wargaysyada, warqado macluumaad ku saabsan Title I.